

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:
<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Diisambar 7, 2020

Ku socota: Dhammaan Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Miisaaniyada Guddoomiyaha Gobolku Soo jeedisay ee loogu talagalay Adeegyada I/DD

Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown ayaa dhawaan soo saartay miisaaniyadeedii ay soo jeedisay ee loogu talagalay muddada labada sano ah 'biennium' ee 2021-2023.

Miisaaniyada guddoomiyaha gobolka ee loogu talagalay ODDS:

- waxay ilaalinaysaa shuruuda u qalmida iyo heerarka adeega ee ee hadda ee jira loogu talagalay dadka u baahan adeegyada I/DD.
- waxay maalgelinaysaa lacag ka yara badan \$34 malyuun si looga soo wareego qaabkii qiimaha daryeel bixiyaha ee waqtiga badan jiray iyo waxyaabaha loo adeegsado qiimeynta ee hadda jira, oo loo wareego adeega cusub oo koox ahaaneed oo ku saleysan Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA) iyo qaabka lacag bixinta oo cusub.
- Waxay sii wadaa wax goyntii/jaristii la sameeyay intii laga jiray Kulankii Gaarka ahaa ee 2020, oo ay ku jiraan in meesha laga saaro Nidaamyada Isku xirka Qoys ilaa Qoys kale iyo meesha ka saarista maalgelinta loogu talagalay nidaamka tiknoolajiyada macluumaadka ee maareynta kiiska ee gobolka oo dhan.

- waxaa ka mid ah maalgelin lagu bixinayo helitaanka luqada oo weyn oo loogu talagalay adeegyada ODDS.

Miisaaniyada Guddoomiyaha Gobolka ee 2021-23 ee loogu talagalay ODDS waa \$3,589.3 milyan oo ah wadarta dhaqaalaha, kaasi oo ah korodhka boqolkiiba 16.4 ee Miisaaniyada Sharci ahaanta Loo Ansixiyay 2019-21

Sawirka dhaqaale ee gobolku wuxuu u muuqda mid aad uga rajo wanaagsan sidii uu ahaa maalmihii hore ee cudurka baahsan ee COVID-19. Miisaaniyadani waxay sii wadaa waxoogaa dhimis ah oo lagu sameynayo adeegyo aad muhiim u ah, kuwaasi oo aan qiime weyn u lahayn qoysayska. Isla mar ahaantaa, miisaaniyadani waxay suurtagal ka dhigaysaa in la ilaaliyo adeegyada oo la sameeyo maalgelin loogu talagalay dadka aanu taageerno iyo nidaamka I/DD.

[Soo koobida miisaaniyada oo isku duuban](#) ayaa la jirta marka lagu daro istiraatiijiyada miisaaniyada buuxda ee Guddoomiyaha Gobolka oo laga haleyo budget.oregon.gov.

Miisaaniyada Guddoomiyaha Gobolku waa tallaabo loo qaaday dhanka nidaam dheer. Bisha Janaayo, Sharci dejinta ayaa bilaabi doonta shaqo adag oo lagu dejinayo waxa noqon doona kama dambeysta, Miisaaniyada Sharci ahaanta Loo Ansixiyay (LAB). Waxaa jiri doona fursado badan oo loogu talagalay u doodayaasha, daneeyayaasha iyo daryeel bixiyayaasha I/DD si fikrad loo siiyo sharci-dejiyayaasha inta uu socdo kulanku. Waxaan rajeynaynaa in aan idinla shaqeeyo inta uu socdo kulanku waxaan idin siin doonaa macluumaad marka aanu ogaano waxyaabo dheeraad ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.